

Taageeridda ardayda kalkaalinta caafimaadka barata ee saboolka ah

Febraayo 8, 2023

Dawladda Alberta waxay ballaarinaysaa Deeqda Waxbarasho ee Saboolka (New Beginnings Bursary) si ay uga caawiso 1,700 ardayda saboolka ah inay noqdaan kalkaaliyaal caafimaad.

Alberta waxay leedahay shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee ugu fiican adduunka. Dawladda Alberta waxa ka go'an inay xaqiijiso dadka reer Alberta inay ku helaan daryeelka ay u baahan yihiin, goorta iyo goobta ay ugu baahan yihiin. Tan waxaa ka mid ah xaqiijinta inay jiraan fursado badan oo arday badan helaan. In nidaamka waxbarashada dugsiga sare kadib ee Alberta laga dhigo mid raqiis ah waxay caawin doontaa Alberta inay tabobarto kalkaaliyayaal caafimaad oo gobolku u baahan yahay.

Maalgalin \$8.5 milyan ah oo dheeraad ah oo ah Deeqda Waxbarasho ee Saboolka (New Beginnings Bursary) darteed, ilaa 1,700 oo arday oo baran doonta kalkaalinta caafimaadka ayaa mutaysan doona deeq halmar ah, oo aan dayn ahayn oo dhan \$5,000. Dadka ka faa'idaysanaya barnaamijyada kalkaalinta caafimaadka si otomaatig ah ayaa looga xulan doonaa dalbadayaasha daynta ardayda kuwaasi oo buuxiyay shuruudaha mutaysiga ee barnaamijka iyo heerkooda maaliyadeedba.

Maalgalinta cusub waxay horumarin doontaa Qorshaha Hawgalka Daryeelka Caafimaadka ee Alberta si loo caawiyo wax looga qabto baahida dheeriga ah ee loo qabo kalkaaliyayaasha caafimaadka iyo xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee Alberta. Sanadkii hore, dawladda Alberta waxay ka abuurtay ugu dhawaan 2,500 oo boos oo cusub barnaamijyada caafimaadka la xiriira gobolka oo dhan. Dadaalada kale waxa ka mid ah in la ballaariyo tabobarka kalkaaliyayaal caafimaad ee dibada wax ku bartay iyo maalgalinta barnaamijyada waxbarashada muddada kooban ee daryeelka caafimaadka.

Deeqda Waxbarasho ee Saboolka (New Beginnings Bursary) waxa la abuuray 2022 si loo kordhiyo helitaanka waxbarashada dugsiga sare kadib ee dadka ay dhici karto inayna awoodin inay kaqaybgalaan, caqabado maaliyadeed dartood. Dhammaadka sanad dugsiiyeedka 2023-24, 3,400 oo ah arday sabool ah ayaa ka faa'idaysan doona deeqda, taasi oo dhan \$17 milyan. Deeqdu waxay bilawday taageeridda ardayda sanad dugsiiyeedka 2022-23. Kaalmada Ardayga Alberta waxay maalgalin doontaa dadka buuxiya shuruudaha mutaysiga kuwaasi oona loo ansixiyay dalabyada daynta iyo deeqda maaliyadeed intii lagu gudo jiray sanad daymeedka 2022-23.

Macluumaadka la xiriira

[Deeqda Waxbarasho ee Saboolka \(New Beginnings Bursary\)](#)

[Alberta 2030: Dhisidda Xirfadaha Shagada](#)

[Qorshe Howleedka Daryeelka Caafimaad \(Healthcare Action Plan\)](#)

Su'aalaha saxaafadda

Sam Blackett

Sam.Blackett@gov.ab.ca

587-589-6048

Afhayeenka, Waxbarashada Sare